Ontario Health
Cancer Care Ontario

# Baaritaanka Kaansarka Naaska ee loogu talagalay Dadka ay Da'doodu u dhaxeyso 40 ilaa 49

## Waxa Aad u Baahan Tahay In Aad Oggaato

Barnaamijka Baarista Naaska ee Ontario (The Ontario Breast Screening Program) ayaa ku dhiirrigeliya dadka ay da'doodu u dhaxeyso 40 laa 49 in ay go'aan xog-ogaal loo yahay ka qaataan haddii laga hubinayo, ama laga baarayo, kaansarka naaska. Kala hadal dakhtarkaaga qoyska, kalkaalisadaada caafimaadka ee xirfadlaha ah ama hagaha Health811:

- halista shakhsiyeed ee aad ugu jirto in aad qaado kaansarka naaska
- faa'iidooyinka suuragalka ah iyo waxyeellooyinka suuragalka ah ee uu leeyahay baaritaanka kaansarka naaska
- waxa adiga kuugu muhiimsan marka la daryeelayo caafimaadkaaga

Inta badan dadka koox da'aadaada ah ee go'aamiya in laga baaro kaansarka naaska waa in raajada naaska (mammogram) la saaraa 2 sano kasta.

### Kumaa Ka Qaybgali Kara Barnaamijka Baarista Naaska ee Ontario?

Haweenka, dadka Ruuxa Dheddig-laboodka leh (Two-Sprit people), dadka labeebka ah (trans) iyo dadka aan labada-jinsi toona ahayn (nonbinary) oo ay da'aadooda u dhaxeysa 40 ila 74 waxayna xaq u yeeshaan baaritaanka haddii:

- aysan lahayn astaamaha kaansarka naaska
- aysan lahayn taariikh shakhsiyeed oo ah kaansarka naaska
- aysan lahayn qalliinka lagu jaro ama gooyo naaska (qallinka lagu bixinayo nudaha naaska)
- aan lagu sameyn baaritaanka raajada naaska 11kii bilood ee ugu dambeeyay gudahooda
- ay yihiin dad jinsigoodu dheddig ahaan u badan ama adeegsadey hoormoonta dheddiga ugu yaraan 5 sano oo is-daba joog ah

Sidoo kale waa mid ammaan iyo wax-ku-ool ah in la baaro iyaga oo uur leh. Haddii aadan doonayn in lagu baaro adiga oo uur leh, waxaad baaritaanka bilaabi kartaa ka-dib marka ay 3 bilood ka soo wareegato dhalmadaada, xitaa haddii aad weli naas-nuujinayso.

***Xusuusnow:*** La xiriir dhakhtarka qoyskaaga ama kalkaalisada xirfadlaha ah haddii aad wax isbeddel ah ka dareento naasahaaga (xabadka), sida kuus ama guduudasho aan baxaynin, ama isbeddelo ku yimaada ibta naaskaaga. Saameynta uurka iyo naas-nuujinta ayaa qarin kara astaamaha kaansarka naaska ama waxaa ay u keeni karaan in laga ilduufo, haddaba waxaa muhiim ah in aan la iska indha-tirin. Isbeddelada ku yimaada naaska (xabadka) had iyo jeer ma keeno kaansar, laakiinse waa in si degdeg ah loo hubiyaa.

### Fahamka Halistaada Shakhsiyeed

Waxyaabaha keena halista kaansarka naaska waa sifooyin shakhsiyeed oo saameeya fursadaada qaadista kaansarka naaska. Waxaad wax badan ka oggaan kartaa waxyaabaha halista shakhsiyeed keena adiga oo buuxinaya su'aalaha qoraalka ah ee barta internetka ee ku saabsan halista kaansarka naaska ee My CancerIQ

(mycancerIQ.ca), kuwaas oo kugu qaadanaya ku dhowaad 15 daqiiqo waxaanna lagu heli karaa luuqadaha Ingiriiska iyo Faransiiska.


Cilmi-baarista qaar waxay muujinaysaa in fursadaha qaadista kaansarka naaska ama u dhimashada kaansarka naaska in ay u kala duwan yihiin dadka isirrada iyo sinjiyada kala duwan. Xog laga helay dadka Kanada (Canadian) ayaa muujinaysa in haweenka aan Caddaanka ahayn laga helo iyo in ay u dhintaan kaansarka naaska iyadoo ay da'doodu yar tahay marka loo eego haweenka Caddaanka ah. Haseyeeshee, ma jirto cilmi-baaris ku filan in lagu saleeyo soo-jeedimada baaritaanka kaansarka naaska oo gaar ah oo ku saleysan isirka, siniga, ama Asali ahaan. Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo mowduuca ku saabsan ka eeg boggeenna internet-ka: ontariohealth.ca/breast-cancer-differences.

## Go'aaminta haddii Baaristu ay Kugu Habboon Tahay Adiga

Guud ahaan, waxaa hooseysa fursadda dadka ay da'aadoodu u dhaxeyso 40 ilaa 49 ay ku qaadayaa kaansarka naaska marka loo eego dadka ay da'doodu u dhaxeyso 50 ilaa 74. Tani waxaa ay ka dhigan tahay faa'iidooyinka suuragalka ah iyo waxyeellooyinka suuragalka ah ee baaritaanka kaansarka naaska in ay u kala duwanaan karaan dadka ay da'doodu u dhaxeyso 50 ilaa 74. Haddii aad go'aansato in aadan hadda isbaarin, waxaad maankaaga wax ka beddeli kartaa goor dambe. Barnaamijka Baaritaanka Naaska ee Ontario waxaad bilaabi kartaa in aad isbaarto waqti kasta laga bilaabo da'da 40 ilaa 74.


Iyadoo lagu saleynayo macluumaadka laga helayo barnaamijyada baaritaanka kaansarka naaska ee dalka Mareykanka waxaa la qiyaasay in:

**HADDII 1,000 HAWEEN AY BAARITAANKA KU BILAABAAN DA'DA 40**



**779** haween ah **kala ma kulmi doonaan wax waxyeello halis ah** baaritaana kaansarka naaska (dhibic buluug ah*)
Ilaa **200 bayoobsi oo aan loo baahnayn** ayaa dhici doona in laga qaadi cimrigooda oo dhan (laba-jibbaar buluug-guduud ah*)
**12 kiisas oo oggaansho xad-dhaaf ah** ayaa dhici doona cimrigooda oo dhan (xiddig jaalle ah*)
Ilaa **9 dhimasho oo ka dhalan karta kaansarka naaska ayaa laga fogaan karaa** cimrigooda oo dhan (saddexagal cagaar ah*)
**Qaab kastaa wuxuu metelayaa 1 qof*

**HADDII 1,000 HAWEEN AY BAARITAANKA KU BILAABAAN DA'DA 50**



**833** haween ah **kala ma kulmi doonaan wax waxyeello halis ah** baaritaana kaansarka naaska (dhibic buluug ah*)
Ilaa **150 bayoobsi oo aan loo baahnayn** ayaa dhici doona in laga qaado cimrigooda oo dhan (laba-jibbaar buluug-guduud ah*)
[**10 kiisas oo oggaansho xad-dhaaf ah** ayaa dhici doona cimrigooda oo dhan (xiddig jaalle ah*)
Ilaa **dhimasho oo ka dhalan karta kaansarka naaska ayaa laga fogaan karaa** cimrigooda oo dhan (saddexagal cagaar ah*)
**Qaab kastaa wuxuu metelayaa 1 qof*

Kooxda baaritaanka ku bilaabaysa da'da 40 waxaa aad u yar in ay u dhintaan kaansarka naaska ku dhaca marka loo eego kooxda baaritaanka ku bilaabaysa da'da 50. Haseyeeshee, kooxda baaritaanka ku bilaabaysa da'da 40 waxaa sidoo kale ay aad u badan tahay in ay waxyeellooyin kala kulanto baaritaanka, sida natiijooyin waa laga helay oo been ah (natiijooyin aan caadi ahayn, xitaa haddii uusan kaansar jirin), baayobsi aan loo baahnayn (muunado nude) iyo oggaanshaha aan loo baahnayn (oggaanshaha iyo daaweynta kaansar aan wax dhibaato ah u geysaneynin qofka cimirigiisa oo dhan). Iyadoo ay sababtu tahay in macluumaadkan laga helay dalka

Mareykanka, ayaa waxaa laga yaabaa in aan lagu dabaqin dadka Kanada (Canadians) iyadoo loo sababeynayo kala duwanaanshaha nidaamyada daryeelkeenna caafimaadka.

## Sida Loo Qabsado Ballanta Baaritaanka

Waxaad qabsan kartaa ballanta raajada naaska (mammogram) adiga oo la xiriiraya goobta Barnaamijka Baaritaanka Naaska ee Ontario. Uma baahnid soo gudbin, ama dalab, ka yimaada dakhtarkaaga ama kalkaaliye caafimaad si laguu baaro.
Si aad u hesho goobaha, macluumaadka gaarista, saacadaha shaqada, waqtiyada sugitaanka iyo macluumaadka xiriirka, booqo barta Waqtiyada Sugitaanka Ontario Health ee ontariohealth.ca/breastscreeninglocations ama wac 1-800-668-9304 si laguugu xiro goobta Barnaamijka Baaritaanka Naaska ee Ontario.

Ma u baahan tahay macluumaadkan oo ah qaab fudud oo la adeegsan karo? 1-877-280-8538, TTY 1-800-855-0511, **info@ontariohealth.ca**.